

**Nuxurka Shirka Guddiga Maamul-wanaagga Maaliyadda (FGC)
Kulankii 66-aad – 25ka Nofeembar 2024, Muqdisho, Soomaaliya**

Hordhac

Guddiga Maamul-wanaagga Maaliyadda ee Soomaaliya (Financial Governance Committee) ayaa ku kulmay 25-kii bisha Nofeembar 2024, magaalada Muqdisho, si ay uga wada hadlaan arrimaha muhiimka u ah maamul-wanaagga iyo hufnaanta maaliyadeed ee dalka. Kulanku wuxuu diiradda saaray qoddobo ay ka mid yihiin kordhinta dakhliga, maareynta khayraadka, iyo dib-u-habaynta hay'adaha qaranka. Waxaa la isla gartay tallaabooyin muhiim ah iyo warbixinno door ah oo kor loogu qaadayo hufnaanta iyo isla xisaabtanka.

Kordhinta Dakhliga iyo Isku-xirka Miisaaniyadda: Xubnaha FGC ayaa ka wada hadleen horumarinta nidaamka uruurinta dakhliga gudaha, oo ay ku jiraan hirgelinta canshuurta iibka iyo isku-dubarridka kastamyada. Waxa kale oo laga dooday nidaamka khidmadaha dekedaha iyo dib-u-eegista siyaasadaha muhiimka ah ee federaalka miisaaniyadda iyo qaabeynta dakhliga. Tallaabooyinkan ayaa ah kuwo lagu dejinayo nidaam maaliyadeed oo waara isla markaana loo simanyahay.

Maamulka Khayraadka (Kalluunka iyo Baatrootka): Guddiga ayaa warbixino ka helay xaaladda ruqsadaha ee kalluumeysiga iyo shidaalka. Wasiirka Kalluumeysiga oo shirka goobjoog ka ahaa ayaa faahfaahin ka bixiyay qorshayaasha ruqsadaha kalluunka ee 2025 iyo wada-hadallo la xiriira la-hawlgalayaasha muhiimka ah. Wasiirka Maaliyadda ayaa soo bandhigay shaqooyinka Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) ee la xiriira shidaalka, iyadoo lagu saleynayo barnaamijyada la xiriira shaqadan ee hay'adda IMF. Tani ayaa muujineysaa sida ay DFS uga go'an tahay habraaca saxda ah iyo hufnaanta qandaraasyada baatrootka. Waxaa la isla gartay qodobbo muhiim ah oo lagu xoojinayo shaqooyinka socda iyo kuwa mustaqbalkaba.

Kormeerka Qandaraasyada iyo Heshiisyada: Xubnaha FGC ayaa waxa ay ka wada hadleen xaaladda heshiisyada iyo geeddi-socodyada waaweyn ee iibsiga. Waxaana xoogga la saaray in qandaraasyadu ay raacaan nidaamka sharciga iibsiga iyo hufnaanta maamulka qandaraasyada.

Dib-u-habaynta Maaliyadda: Shirka ayaa waxa Xubnaha FGC lagu siiyay warbixin ku saabsan horumarka dhawaanahan laga sameeyay waaxda maaliyadda ee dalka, oo ay ku jirto qorshaha lagu soo bandhigayo Nidaamka Lacag-bixinta Deg-degga ah ee Soomaaliya. Waxaa sidoo kale laga warbixiyay istiraatiijiyadda shanta sano ee cusub ee Bangiga Dhexe ee Soomaaliya (CBS) iyo horumarrada dib-u-habaynta hay'adaas, oo ay ka mid tahay maamulka hufnaanta shaqaalaha. Guddoomiyaha Bangiga Dhexe ee Soomaaliya ayaa xusay in dib-u-habaynta lacagta ee Soomaaliya ay tahay tiirka koowaad ee istiraatiijiyadda cusub.

Dib-u-eegista Dastuurka ee Maaliyadda & Warbixinta Maamulka Maaliyadda 2024

Xubnaha shirka ayaa loo soo bandhigay qorshayaasha lala wado guddiga dib-u-eegista dastuurka iyo Wasaaradda Caddaaladda si ay uga wada shaqeeyaan cutubka maaliyadda ee dastuurka kahor doodaha baarlamaanka. Guddiga ayaa sidoo kale dib-u-eegis qoraalka hordhaca ah ee Warbixinta

Maamulwanaagga Maaliyadda ee sannadkan 2024, waxaana laga dooday mowduucyo muhiim ah iyadoo la isku afgartay in lasoo bandhigo qabyo-qoraalka ugu horreeya kulanka kan xiga.

Gunaanad

Guddoonka shirka ahna Wasiirka Maaliyadda Mudane Biixi Iimaan Cige ayaa hoosta ka xarriiqay muhiimadda ay leedahay dib-u-habeynta joogtada ah iyo habraacyada maamul ee hufnaanta maamulka maaliyadeed. Kulanka ayaa wuxuu kusoo dhammaaday si guul leh, guddiguna waxay ku adkeysteen ballanqaadkooda ku aaddan wax ka qabashada tiirarka maamulka maaliyadda iyo xasilloonida nidaamka dhaqaale ee Soomaaliya.